

Waakan go' aankaagii la gaaray.

Aniga waxaan halkan ku soo lifaaqay warqad kuu qeexaysa wixii ka soo baxay go' aankaagii la gaaray iyo sababta. Waxaan rajaynayaa in aad fahamsan tahay aadna ku qanacsan tahay adeegyadii aad heshay.

Cabasho ama su'aalo

Haddii aad qabtid su'aalo ama cabasho ku saabsan go'aankii lagaa gaaray ama adeegyadeena, waad nala soo xiriiri kartaa.

Taleefankan **0800 096 1928**

Telefoonka qoraal (Textphone) **0800 096 1929**

Waad na soo wici kartaa inta u dhexeysa 9.00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa iyo Jimcaha. Taleefanka guriga waa lacag la'aan. Annaga ayaa kugu soo celin doonna haddii aad isticmaashid ka gacanta.

Boostada ku soo hagaaji

Independent Review Service

FREEPOST

Fakiska 0121 606 2184

Haddii adiga aadan si fiican wax indhaha uga arkeyn ee aad waraaqahayaga ku dooneysid Qoraalka indhoolaha ee Braille, cajalad ama in laguugu daabaco qoraal waaweyn fadlan naga soo wac **0800 096 1928**.

Haddii aad dooneysid in aad nagula hadasho ama aad warqad noogu soo qortid luqad kale, waan kuu heli karnaa. Taleefanka nagala soo xiriir **0800 096 1928** markaas ayaan kaala hadli doonnaa.

Ballanta aan kuu qaadayno

Annaga jawaab buuxda ayaan kaa siinaynaa ashtakadaadii sida ugu dhaqsada badan ee aan haleeli karno, badanaaba 15 casho gudahooda. Mararka qaarkood laga yaabo in aan baaritaan dheeraad ah sameyno ama aan ka soo qaadanno waraaqahaaga kuwa Jobcentre Plus markaana ey qaadata waqti dheer.

Haddii aad ashtakoodid annaga si caddaali ah ayaan kuula dhaqmeynaa.

Haddii annaga aan sameyno wax qalad ah waan kaa raali gelineynaa markaa ayaan hagaajineynaa.



Caawinaad kale

Ururrada soo socda ayaa laga yaabaa in ey ku caawiyaan eyna ku siiyaan talo guud ahaaneed iyo gargaar. Kuwa Adeegyada Dib u Baaritaanka ee Madax banaan (The Independent Review Service) masuul kama ahan waxii akhbaar ah ee ururka ey dhiibaan.

Citizens Advice Bureau (CAB)

Kan kugu dhow ee CAB waa meesha ugu fiican ee aad ka heli karto talo wanaagsan ee bilaash ah kuna saabsan xagga sharciga, lacagta iyo dhibaatooyin kale. Waxaad ka heli kartaa CABga kugu dhow buuga taleefanka ama www.citizensadvice.org.uk ee England iyo Wales ama www.cas.org.uk tan xafiisyada ee Scotland.

Talada Sharciga Bulshada (Community Legal Advice) (CLA)

Haddii aad xaq u leedahay caawinaadda xagga kharashka sharciga, Talada Sharciga Bulshada ayaa ku siin karta caawinaad bilaash ah ee qarsoodi ah ama talada sharciga ey taleefanka kugu siin karaan wixii ku saabsan dhibaataada deynta, guryaha, shaqada, waxbarashada, gunnada ama macowinada dowladda.

Wac **0845 345 4 345** ama ka raadi internetka cinwaankana waa www.communitylegaladvice.org.uk

Ururka ka Welwelo Waayeellada (Age Concern) iyo Daryeelka Waayeellada (Help the Aged)

Ururka ka Welwelka Waayeellada iyo Daryeelka Waayeellada way isku darmeen si ey u habeeyaan daryeelada wadaniga qasuus ah si loo sii wanaajiyo nolosha dadka waayeeldada ah. Ayaga waxey siiyaan gargaar dadka oo dhan ee da'doodu ka badan tahay 50 sano si lagu habsado sida ey u helaan waxyaabaha ku saabsan habeynta noloshooda. Sidii aad ku heli laheyd talo qarsoodi iyo gargaarka waxaad soo wici kartaa **0800 009 966** England iyo Wales, haddii aad joogtid Scotland **0845 125 9732** ama booqo bogaggooda internetka ee ah www.helptheaged.org.uk ama www.ageconcern.org.uk

Khadka deynta ee Qaran

Khadka deynta ee Qaran waxey dadka siiyaan caawinaad bilaash ah, eena qarsoodi ee madax banaan sidii aad u xallin laheyd dhibaataada deynta eyna kugu siinayaan talada taleefanka. Adiga waxaad ka wici kartaa taleefankooda ee bilaashka ah **0808 808 4000** teeda kale waxaad foomka kala soo bixi kartaa boggooda internetka cinwaankiisu yahay www.nationaldepline.co.uk

Khadka Lacagta Deynka ee Sharci Daradda ah (Illegal Money Lending Hotline)

Haddii adiga aad ka deynsatid lacag qof aanan laheyn shati, adiga ma jebinin sharciga – ayaga ayaa jebiyay. Kooxda Deynka Sharci Daradda ayaa baaraya kuna soo oogaya dembi deynmiyayaalka ah yaxaas badeedka wadanka oo dhan teeda kale ayaga ayaa dadka ka caawiya sidii ay ku heli lahaayeen talada deynka munaasibka ah. Haddii aad heysid wax akhbaar ah ee ku saabsan deynmiyaha yaxaas badeedka waxaad soo wici kartaa taleefankan qarsoodiga ah ee furan 24 saacadood; soo wac **0300 555 2222**.

Siyaasadeena ee ah xagga sirta waxey kuu macnaynaysaa sida aan u isticmaalno akhbaarada aad na siisid annaga. Sida aad ku heli kartidna waa in aad soo codsatid ama aad gashid bogga internetka ee ah www.irs-reiew.org.uk.

Adiga waxa aad xaq u leedahay iyo sharciga

Markii aan ku siino jawaab ku saabsan dacwo (ama ashtako) ama su'aalo adiga waxa aad xaq u leedahay in aad ka hadashid haddii weli aadan ku faraxsaneyn jawaabteena. Adiga laga yaabo in aad u baahan tahay caawinaadda ee looyarrada, Citizens Advice Bureaux ama xarunta sharciga. Adeegyada Dib-u baarida Madaxbanaan ka dib waxaa jira Maxkamadda Sare haddii aadan ku qanacsaneyn go'aankii lagaa gaaray (ee loo yaqaano Dib-u baaridda Garsoorka). Ama Dhexdhexaadiyaha Adeegga Baarlamaanka iyo Caafimaadka haddii aadan ku faraxsaneyn howsheena ama adeeggeena.